



Rachel Miller, M.Ed.

Macalin Bixiya Taageer Dheeraad Ah (Resource Teacher)

Barnaamijka Wacyigelinta Caafimaakda Galmada

rmiller@sandi.net

www.sandiegounified.org/SHEP

FOOMKA OGEYSIINTA WAALIDKA

U Kuurgalka Dhaqanka Dhalinyarada Ee Halista Ah Ee 2021 (Youth Risk Behavior Survey 2021)

Waxda Ciyaaraha Ardayda (The Department of Interscholastic Athletics), APE, ASB, JROTC, PE iyo SHEP Ee Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego ayaa iyadoo khaashanaysa Xarumaha Xakamaynta Iyo Ka Hortaga Cudurada (Centers for Disease Control and Prevention [CDC]) rabto inuu cunugaaga ka qayb-qaato U Kuurgalka Dhaqanka Dhalinyarada Ee Halista Ah Ee Dugsiga Sare Ee 2021 (2021 High School Youth Risk Behavior Survey [YRBS]). U kuurgalkaan waxaa marki ugu horeysey degmada dugsigeena laga bixiyey markey ahayd 1991 ilaa markaasna waxaa loo bixinaayey sanad dhaaf. Maadaama aan isku fiirin karno natiijooyinka u kuurgalka hada la bixinaayo iyo natiijooyinka u kuurgalyaasha hore, waxaan arki karnaa siduu dhaqanka ardayda isku bedelaayo ama meeshu u socdo. Macluumaadka wuxuu haggaa go'aamada aan ka gaareyno hirgelinta barnaamijyo caafimaad oo loogu talagalay ardayda joogo degmada dugsigeena.

Wuxuu u kuurgalka uruurin doonaa macluumaadka caafimaadka oo khuseeyo meelaha soo socda: saamaynta uu xiritaanka dugsiyada oo loo xirey COVID-19 ku leeyahay caafimaadka maskaxda iyo fulinta tacliinta; waxyaabaha difaaca ee nolosha ardayda; waxyaabaha xun ee lagula kulmo caruurnimada; waxyaabaha lagala kulmo wax barashada caafimaadka; isticmaalka khamrada, tubaakada, iyo daroogooyinka kale; rabshada dadka xiriirka ka dhexeeyo (relationship violence); dabeecadaha galmada; iyo dabeecadaha kale oo dhalin karo dhaawac iyo rabsho oo ula kac ah ama aan ula kac ahayn.

Si taxadar leh ayaa loo ilaaliyaa waxyaabaha gaarka u ah ardayda. U kuurgalkaan waa magac la'aan (anonymous). Lama rabo inay ardaydu xogwareysigaan (questionnaire) ku qoraan magacooda ama galaaskooda ama magaca dugsigooda. Qiyaas ahaan lixdan galaas (fasalada 9-12) oo ka socda dugsiyada sare ee degmada dugsiga oo tiradoodu ah 24 ayaa ka qayb-qaadan doona u kuurgalka 2021.

Xogwareysiga YRBS oo ku qoran luuqado badan iyo natiijooyinka u kuurgalyaashi hore ayaa ka heli kartaa www.sandiegounified.org/YRBS. Sidoo kale dugsiga cunugaaga ayaad ka eegi kartaa xogwareysiga (oo ku qoran Ingiriis ama Isbaanish). Hadii aad qabto su'aalo, fadlan la xiriir Rachel Miller oo laga heli karo rmiller@sandi.net ama (619) 725-7121.

Hadii aad rabin inuu cunugaaga ka qayb-qaato u kuurgalkaan, fadlan saxiix meesha hoos ku taalo oo loogu talagalay saxiixa markaas foomkaan u soo celi macalinka galaaska uu cunugaaga dhigto ilaa Setembar 27, 2021.

MA RABO inuu cunugeyga ka qayb-qaato U Kuurgalka Dhaqanka Dhalinyarada Ee Halista Ah Ee 2021 (2021 Youth Risk Behavior Survey).

Dugsiga: _____

Magaca Ardayga: _____

Magaca Waalidka ama Qofka Masuulka Ka Ah Ardayga: _____

Saxiixa Waalidka ama Qofka Masuulka Ka Ah Ardayga: _____